



# Cigaal Shiidaad iyo laxdiisii







# Cigaal Shiidaad iyo Iaxdiisii

Buugga 2<sup>aad</sup> | Fasalka 2<sup>aad</sup>




Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Waxaana isla diyaariyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Waxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



beri baa Cigaal Shiidaad  
wuxuu daganaa meel miyi  
ah. wuxuuna lahaa adhi  
farabadan isaga ayaana  
raaci jiray adhigaas.



Adhiga waxaa ku jirtay  
lax uu Cigaal Shiidaad  
si gaar ah u dhaqaaleyn  
jiray oo uu aad u jeclaa.



Intuu geedaha hoostooda  
cawska iyo abqada uga  
soo guro ayuu gacmaha  
ku siin jiray marwalbana  
xagiisa ayay u soo ordi  
jirtay.



Maalintii dambe ayaa  
Cigaal Shiidaad adhigiisii  
la jooga ayuu arkav  
laxdii oo intay indhaha  
caddaysay aad xaggiisa u  
soo eegeysa.





Ugu dambayntiina intay  
malafsatay ayay xaggiisa  
u soo dhaqaaqday.



Cigaal oo ay cabsi wayn gashay ayaa intuu waran uu gacanta ku haystey isaga waabiyey ku yidhii: “garo, wayna i garan, wayna i gaadi oo inay i cunto ayay rabtaa”!!

